



VALG

Warbixin muhiim ah oo ku socota qofka codkiisa dhiibanaya

Doorashada golaha degmada (Kommunestyre)- iyo golaha degaanka gobolka (fylkestingsvalget) ee 2011-ka



**Maalinta doorashadu waa 12.ka sibtember.
Xusuuso inaad aqoonsi soo qaadato!**

af soomaali | somali



KOMMUNAL- OG REGIONALDEPARTEMENTET

Doorashada golaha degmada (Kommunestyre)- iyo golaha degaanka gobolka (fylkestingsvalget) ee 2011-ka

Golaha degmadu waa unugga ugu sarreeya degmada. Halkaan ayaa lagu gaaraa go'aammada waaweyn ee arrimaha degaanka sida xannaanooyinka carruurta, maadinta carruurta, dugsiyada hoose/dhexe, adeegyada caafimaadka iyo daryeelka, hawlgallada dhaqanka iyo nadaafadda.

Golaha degaanka gobolku waa unugga ugu sarreeya golaha degmooyinka gobolka (fylkeskommunen). Golaha degaanka gobolka ayaa gaara go'aammada waaweyn ee waxyaalaha ay ka midka yihiin waxbarashada dugsiyada sare, waddooyinka gobolka iyo marrinnada doomaha ee kuwaa ku xiran, gaadiidka dadweynaha ee gobolka iyo hawlgallada dhaqanka.

Oslo waxaa ka jira doorasho xaafadeed, ee kama jirto doorasho gole degaan gobol.

Arrimaha meesha aad deggan tahay ayaa saamaynta ugu badan ku leh adiga nololmaalmeedkaaga. Haddaba marka aad codkaaga dhiibato, waxaad ka qaybqaadanaysaa go'aaminta cidda matalaysa adiga iyo danahaaga.

Buuggan yar waxaa ku qoran warbixin ku saabsan sidaad doorashada u dhiiban lahayd.

Maalinta doorashadu waa isniinta 12.ka sibtembar 2011

Degmooyin badan ayaa doorashada xataa qabanaya axadda 11.ka sibtembar. Degmada ayaa sheegeysa inay doorashadu dhacayso hal maalin ama labo maalmood.

Xusuuso inaad aqoonsi soo qaadato markaad codka dhiibanayso!

Sharciga doorashadu wuxuu dhigayaa qofka codkiisa dhiibanaya ee kan codka ka qabanaya uusan aqoonnin inuu aqoonsi dhiibto. Waxaa tusaale ahaan aqoonsi noqon kara baasabboor, laysin baabuur ama kaar bangi oo sawir leh, laakiin nooc kale oo aqoonsi ahna waad isticmaali kartaa. Shuruudda aqoonsigu waa inay ku qoran yihiin qofka wax dooranaya magaciisa, taariikhda dhalasho iyo sawir.

Haddii aad ku jirto meel dadka lagu hayo sida guryaha dadka waaweyn, isbataal ama xabsi, waxaa aqoonsigaaga caddayn kara qof ka shaqeeya meesha aad ku jirto.

Dhammaan dadka wax dooranaya waxaa loo diraa kaarka doorashada

Kaarka doorashada waxaa ku qoran goorta iyo meesha aad codkaaga ku dhiibanaysid maalinta doorashada. Kaar doorasho uma baahnid si aad codkaaga u dhiibatid, laakiin saas ayaa kuu dhakhso badan. Kaarka doorashadu *ma aha* aqoonsi.

Yaa codkiisa dhiiban kara?

- Dadka haysta dhalashada Norway ee 18 sano buuxinaya sanadka 2011 gudihiisa kuwaas oo ay u diiwaangashan tahay inay deggen yihiin ama deggena jireen Norway.
- Dadka haysta dhalashada dalalka kale ee waqooyiga ee 18 sano buuxinaya sanadka 2011 gudihiisa, kuwaas oo ay u diiwaangashan tahay inay Norway deggenaayeen ugu danbayn 30-kii juun 2011.
- Dadka haysta dhalashada dalal kale ee 18 sano buuxinaya sanadka 2011 gudihiisa, kuwaas oo ay u diiwaangashan tahay inay Norway si xariir ah u deggenaayeen saddexdii sano ee u danbeeyay maalinta doorashada horteed.

Goortee iyo xaggee ayaad doorashada ku dhiibanaysaa?

Maalinta doorashada waa inaad codkaaga ka dhiibataa degmada aad ka diiwaangashanayd inaad deggan tahay 30-ka juun 2011-ka. Goob kasta oo ka mid ah goobaha doorashada ee degmada ayaadna codkaaga ka dhiiban kartaa. Eeg sawirrada bogga midkaan ku xiga ee tusaya sida aad codkaaga u dhiibanaysa maalinta doorashada.

Inaad codkaaga horey u sii dhiibato waxaad samayn kartaa ilaa iyo jimcada 9.ka sibtember adigoo codkaaga ka dhiiban kara degmadii aad doonto. Codka horey loo sii dhiibanayo wuxuu u dhacaa si ka yara duwan sida wax loo doorto maalinta doorashada.

Sidaan ayaad codkaaga horey ugu sii dhiibanaysaa:


- a) U tag hawl-wadeen doorasho kaas oo ku siin doona bokhshad ay ku jiraan warqadihi cod-bixinta kuuna tilmaami doona qolka doorashada.
- b) La soo bax warqadaha aad dooneyso inaad isticmaasho: mid ah doorashada golaha degmada iyo mid ah doorashada golaha degaanka gobolka.
- c) Wixii beddelaad ah ee aad samayneysid ku samee warqadaha cod-bixinta.
- d) Warqadaha cod-bixinta ku rid bokhshadda warqadaha cod-bixinta. U tag hawl-wadeenka doorashada kaas oo bokhshadda warqadaha cod-bixinta iyo kaarkaaga doorashadaba gelin doona bokhshad dabadeena ku ridi doona santuuqa doorashada. Codka waxaa loo dirayaa degmada aad deggen tahay si loo tiriyo. Warqadaha cod-bixinta lama tiimbaraynayo marka aad codkaaga horey u sii dhiibato.

Haddii aad codka ku dhiibato meel ka baxsan degmadaada, waa inaad isticmaashaa warqado cod-bixin oo caadi ah oo lagu siin doono, ama waa inaad warqado cod-bixin kala timaaddaa degmadaada. Warqadda cod-bixinta ee caadiga ah ma xambaarsana magac musharrax, ee waxa keliya oo ku qoran magac xisbi. Haddii aad haddaba dooneysid inaad codad qofeed (personstemmer) siiso musharrax, waa inaad warqadaha cod-bixinta kala timaaddaa degmadaada. Waxaa iyana sidaas oo kale ah haddii aad codkaaga ku dhiibanaysid meel ka baxsan gobolkaaga.


Haddii aad jirran tahay ama aad hawlgab tahay, waxaad degmada ka codsan kartaa inaad codkaaga guriga horey ugu sii dhiibato.

Degmada ayaa kuu sheegeysa goorta iyo meesha aad codkaaga ku dhiiban karto.


Sidee ayaad codkaaga u dhiibanaysaa maalinta doorashada?




1) Qaado warqadaha cod-bixinta ee aad dooneysid inaad isticmaashid: mid ah doorashada golaha degmada iyo mid ah doorashada golaha degaanka gobolka.




2) Samee wixii isbeddel ah ee aad ku samaynaysid warqadaha doorashada (eeg tilmaamaha ku yaalla bogga midkaan ku xiga).



3) Isku laab warqad kasta oo kuwa cod-bixinta ah adigoo hoos marinaya magaca xisbiga oo soo kor marinaya booska tiimbaraha – markaa cidna ma arki karto xisbiga aad codkaaga siisay. Bokhshad iyo wax kale midna la gelin maayo warqadaha cod-bixinta.



4) U tag hawlwadeen doorasho si uu kuugu tiimbareeyo dhinaca kore ee warqadaha cod-bixinta. Labada warqadood ee cod-bixinta labaduba waa inay tiimbaraysnaadaan si loo aqoonsado!



5) Warqadihii cod-bixinta ee la tiimbareeyay ku rid santuuqa doorashada.

Sidee ayaad u beddeli kartaa warqadda cod-bixinta?

Haddii aad dooneyso inaad saameyn ku yeelato musharxiinta la dooranayo, waa inaad cod-qofeed (personstemme) siisaa musharxiintaa iyaga ah. Xor ayaad u tahay inaad beddesho warqadda cod-bixinta oo aad bixiso cod-qofeed.

Sidaan ayaad u bixin kartaa cod-qofeed:



Marka doorashada golaha degmada:

- Iskutillaab saar goobaabinta (ruten) ku dhinac taalla magaca musharraxa aad dooneyso inaad u codeyso. Intii musharrax oo aad doonto ayaad cod-qofeed siin kartaa.



- Magaca musharraxa xisbiyada/kooxaha kale ku qor meesha gaarka ah ee loogu talo galay ee warqadda cod-bixinta. Inta magac ee musharrax ee aad qori karto waxay ku caddahay warqadda cod-bixinta.

Ogoow in haddii aad cod-qofeed siiso musharxiin ka socota xisbiyo/kooxo kale, qayb codkaaga ka mid ah ayaa loo wareeji-nayaa xisbigaas/kooxdaas kale.

Qiiimaha codkaaga ee xisbiga/kooxda aad u codeyneyso, wuxuu is dhimayaa intii la wareejiyey in u dhiganta.



Marka doorashada golaha degaanka gobolka:

- Iskutillaab saar goobaabinta (ruten) ku dhinac taalla magaca musharraxa aad dooneyso inaad u codeyso. Intii musharrax oo aad doonto ayaad cod-qofeed siin kartaa.

Ha ka baqin inaad beddelaad samayso. Habka aad wax u beddeleyso wuxuu ku qoran yahay warqadda cod-bixinta. Codkaaga la tuuri maayo inkastoo aad khalad samayso!

Yaa la dooranayaa?


Guddiga doorashadu wuxuu marka hore ogaanayaa inta matale ee ay xisbiyada ama kooxaha kala duwan ku yeelanayaan golaha degmada ama golaha degaanka gobolka. Markaas kaddib ayuu guddiga doorashadu tirinayaa cod-qofeedka si loo ogaado musharrixiinta laga soo dooranayo xisbi ama koox walba.

Labo tijaabo oo dhici doona 2011

20 degmo ayay 16- iyo 17-sano jirradu codkooda ka dhiiban karaan doorashada golaha degmada.

10 degmo ayay dadku codkooda dhiiban karaan iyagoo internetka isticmaalaya, waana doorashada golaha degmada iyo doorashada golaha degaanka gobolka.

Warbixin intan ka badan waxaad ka helaya www.valg.no



Waxaa 2011 soo saaray Wasaaradda degmooyinka- iyo gobollada

**Daabacaaddan waxaa loo turjumay toban luuqadood oo qalaad,
waxaana laga helayaa www.valg.no**

Lambarka daabacaadda: H-2257 af soomaali | somali

Warbixin intan ka badan oo doorashada ku saabsan ka eeg www.valg.no ama degmada la xiriiir.